




**VALG**

MACLUUMAADKA

Soomaali | Somali

# Doorashooyinka Degmada iyo Tan magaala-da ee 2019

Macluumaad muhiim ah oo kusocda cod bixiyaasha



Doorashada waxay dhacaysaa Isniinta 9 Septeembar. Horey usoo qaado aqoonsigaaga!

**VALG**direktoratet

# Doorashooyinka Degmada iyo Tan magaalada ee 2019

Doorashooyinka waxay naga caawiyaan inaan doorano dadka noo matalaaya golaha degmadeena iyo tan magaalada.

Golaha magaaladu ayaa ugu sareeya magaalada. Halkaan waxaa lagu garaa go'aanka arrimaha maxaliga ah sida dugsiga xanaanada caruurta, daryeelka caruurta, qorsheynta iyo su'aalaha kusaabsan dhulka, dugsiyada dhexe iyo kan hoose, adeegyada caafimaadka iyo daryeelka, dadaalka dhaqanka iyo ururinta diidmada.

Golaha deegaanka degmada ayaa ugu sareeya gudiga maamulka sare ee degmada. Golaha deegaanka ee dagmadu waxay go'an ka gaaraan arrimaha sida waxbarashada dugsiga sare, wadooyinka degmada iyo waddooyinka aan dhulka ahayn, gaadiidka dadwaynaha iyo dhaqangalinta dhaqanka. Oslo waxay qaban doontaa doorashada golaha iyo doorashooyinka gobalaha deegaanka, laakiin maqabanayso doorashada golaha deegaanka degmada.

Waa arrintaan arinta ugu wayn ee saameynta kuyeelanaysa nolashaada maalinkasta. Marka aad codeenayo waxaad caawimaad kageesanaysaa sidaad u qaadan lahayd go'aanka qofka ku matalaaya iyo baahiyahaaga ku aadan golaha deegaanka iyo kuwa degmada.

Qoraalkaan wuxuu kakooban yahay macluumaadka sida aad u codeenaysid.

## ► **Doorashada waxay dhacaysaa Isniinta 9 Sebteembar 2019.**

magaalooyin badan waxay doorashooyinka qabtaan Axada 8da Sebteembar. Magaalada waxay ku sheegi doontaa in doorashadu soconayso hal maalin ama labo maalmood.

### **Xasuusnoow inaad horey usoo qaadato aqoonsigaaga marka aad coddeenaysid**

Tusaale ahaan aqoonsiyada saxda ah waxaa kamid ah baasaboorka, sharciga darawalnimada ama kaarka bangiga oo leh sawir. Wuxaad sidoo kale isticmaali kartaa aqoonsiyada kale. Ugu yaraan, aqoonsigaaga waa inuu leeyahay magaca, taariikhda dhalashada iyo sawrika. Wakiilada Noorvijiga ee qaabilisan Sharciga Dadka wuxuu u baahan yahay codbixiyaasha aan la garaneyn maamulka doorashada si ay u aqoonsadaan.

Haddii aad kujirtid xaruun sida guriga kalkalisada, isbitaal ama xabsi, waxad heli kartaa shaqaale kasocda hay'ad si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga. Xaaladahaas, shaqaalahaa waxaa qasab ah inay isgartaan.

### **Dhamaan codbixiyaasha waxaa loo diri doonaa kaarka codbixinta**

Qayta hore ee **kaarka** codbixinta waxaa kuqornaan doona macluumaadka kusaabsan goobta codbixinta ee aad ka diiwaan gashantahay iyo saacadaha ay furan yihiin maalinta doorashada. **Uma baahnid inaad sooqaadato kaarka codbixinta si aad u coddeeyso, laakiin inaad sidaas sameyso waxay kuu ilaalinaysaa waqtiga.** Kaarka codbixinta kamid ma ahan aqoonsiyada.

## **Yaa loogu talagalay inay codeeyaan?**

- waxaa codeen kara muwaadiniinta noorweejiga ah ee gaaray da'da 18 sano kahor dhamaadka 2019, kuwaas oo, ama waligoodba, ka diiwaangashan Diiwaanka Qaranka ee dadka degan Norway.
- Muwaadiniinta wadamada waqooyiga Yurub (sida, Denmark, Iceland, Finland ama Iswiidhan) oo gaaray da'da 18 sanadood kahor dhamaadka 2019 kana diiwaangashan Diiwaanka Qaranka ee dadka degan Norway ugu danbeentii 30 ka Juun 2019.
- Waxaa codeen kara dadka aan ahayn muwaadiniinta noorweej ee gaaray da'da 18 sano kahor dhamaadka 2019, kuwaas waligoodba, ka diiwaangashan Diiwaanka Qaranka ee dadka degan Norway ugu danbeen saddex sano kahor doorashada.

Shaqaalaha safaarada ama adeegyada qunsuliyad, iyo qoysaskooda, waxay xaq u leeyihiin in ay codeeyaan, iyaga oo aan loo eegeen haddii ay ka diiwaangashan yihiin Diiwaangelinta Qaranka ee ku noolaa dalka Norway iyo inkale. Uma ay baahna inay codsadaan iskadiiwaan galitaanka diiwaanka doorashada

Cod bixiyayaashu waa in lagaliyaa diiwaanka doorashada ee degmada maalinta doorashada si ay u gutaan xuquuqdooda codbixinta.

## **Halkee ku codeenaysaa goorteese codeenaysaa?**

**Maalinta doorashaday**, Waxaa qasab ah inaad ka codeeso magaalada aad ka diiwaangashan tahay aadna ku nooshahay marka lagaaro 30 Juun 2019. Waxaad ku codeen kartaa xaruun walba oo kutaala magaalada. Fiiiri sawirada kuyaala bogga xiga oo kutusinaaya sida loogu codeeyo degmada gurigaaga.

**Codadka hordhaca ah waxay** soobixi karaan Sabtida 10 Agoosto ilaa iyo Jamcada 6 September ay kujiraan dhamaan magaalada dalka.

Cod bixiyaasha aan awoodin inay codeeyaan inta lagu jiro maalinta coddeenta hordhaca ah ama doorashada waxay laxariiri karaan magaalada waxayna coddeen karaan inta lagu jiro 1 Julaayo ilaa iyo hordhaca coddeenta ay bilaabato 10 agoosto.

**Haddii aad kacodeysid meel aan ahayn magaalada aad dagantahay**, warqadaha coddeenta ee aad heli doonto waxaa kujira magacyada xisbiyada siyaasadeed ee qaranka. Waxaa qasab ah inaad isku tilaab saarto xisbiga aad jeelaan lahayn inaad u codeeyso. Warqadaha codbixinta kuma jiri doonaan magacyada musharaxiinta xisbiyada sidaa daraadeed ma awoodid inaad codkaaga siiso dhaqsi.

Haddii xisbiga ama kooxda aad rabto inaad u coddeeso aysan kuqornayn warqada codbixinta, waxaad kuqorin kartaa warqada codbixinta xisbiga/kooxda aad u coddeenayso. Waa sidoo kale kaheli kartaa waraaqaha codbixinta ee magaaladaada adigoo isticmaaya haddii aad rabto inaad codad gaar ah u dirto musharxiinta.

Haddii aad ka coddeenayso meel kabaxsan magaaladaada, waxaa qasab ah inaad waydii-sato maamulaha xaruunta inuu istaam kudhufto warqadaada kahor inta aadan galin boqshada codbixinta. Boqshada codbixinta iyo kaarka codbixinta markaas kadib waxaa boqshada kudhejin doona maamulaha xaruunta codbixinta. Intaas kadib waxaa qasab ah inaad kurido bokiska warqada codbixinta lagu rido.

Haddii aadan sooqaadan kaarka codbixinta, maamulaha xaruunta codbixinta ayaa mid kuu buuxinaaya. Codbixinta waxaa loo dirayaa qaybta magaaladaada.

Isla sidaas oo kale **haddii aad ka coddeeso meel kabaxsan degmadaada ee doorashooyinka degmada**.

Haddii aad xanuunsantahay ama aad naafo tahay, waxaad magaaladaada kacodsan kartaa inaad ku coddeeso coddeenta hordhaca ah gurigaaga. Magaalada waxay kugu wargali-naysaa waqtiga laguu qorsheeyay.

Haddii aad ka diiwaan gashantahay Diiwaanka Qaran ee dadka degan magaalada ama degmo ay saameysay dib u habeyn magaalada iyo gobolka, waxaad dooraneysaa wakiilada golaha degmada ee magaalada cusub iyo degmada caafimaadka ee degmadaada cusub.

Magaaladu waxay kuu sheegaysaa halka aad kahelasid xaruunta codbixinta iyo xiliyada lafuraayo.

► Waa kale awoodi doontaa inaad oonleen kahesho xaruunta codbixinta laga bilaabo bisha Agoosto adigoo:  
**booqanaya valglokaler.no**


# Sidee oga coddeenaysaa guriga magaalada?




1) Qaado warqada codbixinta aad rabto inaad isticmaasho: mid ah doorashada golaha degmada iyo mid ah golaha deegaanka, haddii aad rabto inaad ka coddeyso labadaas doorashooyinba.




2) Si aad u bixiso cod gaar ah, iskutalaab kuqor sanduuqa ku xiga liiska musharixiinta ee kujira warqadda codbixinta oo aadna doonayso inaad siiso codkaaga. Wuxaad codkaaga gaarka ah siin karaa musharixiin badan inta aad doonto (kafiri habraaca bogga xiga).



3) Isku laab warqada codbixinta si magacyada xisbigu ay hoos u maraan ayna qaybta istaamta kor usoo marto – taasi waxay ka hortagtaa in qofku arko cida aad u coddeysay. Hagalin warqada codbixinta gudaha boqshada ama dabool kale.



4) Aad maamulaha xaruunta codbixinta oo kasoo qaado warqadaha codbixinta oo istaam gareeysan. Tani waa muhiim si codka loo ansixiyo.



5) Kurid warqadaha codbixinta sanduuqa codbixinta.


Oslo waxay qaban doontaa doorashada golaha iyo doorashooyinka gobalaha deegaanka, laakiin maqabanayso doorashada golaha deegaanka degmada. Haddii lagugu qoro diiwaanka doorashada ee Oslo oo aad rabto inaad ka coddeyso doorashada golaha deegaanka, waxaad isticmaali kartaa

waraaqaha codbixinta ee doorashada golaha deegaanka ee aad adigu keentay ama waxaad kuqori kartaa magaca xisbiga/kooxda aad u codeyneso warqada banaan. Haddii aad isticmaasho warqada banaan, waxaa qasab ah inaad warqadaas kuqorto in aad ula jeedo doorashada golaha deegaanka.

# Wax waad ka badbadeli kartaa warqada codbixinta

Haddii aad rabto in aad saamayn kuyeelato musharaxiinta la doorto, waxaad codkaaga siin kartaa musharxiinta aad rabto inay helaan codkaas. Adiga ayay kugu xiran tahay haddii aad dooneysyo inaad isbadel kusamayso warqadaha codbixinta aadna siiso codkaada shaqsi. Habka bixinta codkaaga adoo siinaaya shaqsi waxaa lagu qeexay warqada codbixinta korkeeda.

## Bixinta Codka shaqsiga:



1) Isku tilaab saar bokiska ku agyaala magaca qofka aad rabto inaad siiso codkaaga shaqsi ahaaneed. Wuxaa siin kartaa codkaaga musharxiin badan inta aad doonayso.



2) Meel gaar ah warqada codbixinta kuqor magaca musharaxa kujira kooxda/xisbiyada. Inta lambarada magacyada mushaxa aad kudari karto waxaa lagu qoray warqada codbixinta.

Fadlan ogsoonooow, haddii aad codkaaga shakhsii ahaaneed aad siinayso xisbi/koox kale, liiska kaas waxaa loo wareejinayaa xisbiga/kooxda kale. Tani waxay saameyn kuyeelan kartaa qaybinta golaha degmada.



## Doorashooyinka golaha deegaanka ee degmada:


Isku tilaab saar bokiska ku agyaala magaca qofka aad rabto inaad siiso codkaaga shaqsi ahaaneed. Wuxaa cod siin kartaa musharxiin badan inta aad awoodid ama aad dooneysid.

## **Yaa la dooranaya?**

Gudiga doorashooyinka ayaa marka ugu horeysa go'aan ka gaaraya inta wakiil ee dhinacyada kaladuwan iyo kooxaha kaladuwan ay kaheli doonaan golaha degmada ama golaha deegaanka degmada.

Gudiga doorashada ayaa intaas kadib tirinaaya codadka si ay u ogaadaan musharixiinta kuguulaysatay xisbi kasta ama koox kasta.

**Waxaad macluumaad dheeraad ah oo kusaabsna kahelaysaa [valg.no](#)**



Waxaa la daabacay 2019 waxaana daabacay Norwegian Directorate of Elections (Hay'ada Doorashooyinka ee Noorwaay). Qoraalkaan waxaa sidoo kale lagu helayaa Bokmål, Nynorsk, Sami iyo taban luuqadood oo kale.

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan dooraashada, booqo [valg.no](http://valg.no)